

SOMALISKA
AF SOOMAALI

GASRIYEE ISWIIDHAN

**BAYAANKA DOORASHO
EE XISBIGA BAY'ADA
– MUSTAQBALKU WAA HALKAN**

Xisbiga bay'ada ee kuwa cagaaran, bayaankooda doorashada 2010. Waa isbedel cagaaran oo abuuraya shaqooyin cusub, siyaasad-cimilo oo lagama maarmaan ah iyo istaakulayn caalami ah.

miljöpartiet de gröna



MUSTAQBALKU WAA HALKAN

Doorashada aynu maanta samaynaa waxa ay qaabaynaysaa nolosha aynu mustaqbalka ku noolaanayno. Maalgelinaha aynu maanta samaynaa waxay abuurayaan bulshada ber-rito. Si loo abuurdo horumar waara Aqoontii ku saabsanayd waxa loo baahanyahay, way jirtaa. Waa halkakan iyo hadda in isbedelku ka yimaaddo.

Xisbiga bay'adu wuxu ku gelayaa doorashada siyaasad ku wajahan isbedel cagaaran oo abuuraya shaqooyin cusub, xasillooni korordha iyo Iswiidhan oo sii xoo-gaysata. Waxa aanu doonaynaa in aanu abuurno bulsho wakhti dheer waarta oo u bareeri karta taxaddiyada mustaqbalka.

Xisbiga bay'adu wuxu doonayaa inuu arko maalgelin xoog-gan oo bulshada oo dhan lagu sameeyo isbedel cagaaran- en Green New Deal. Waxanu doonaynaa in aanu dadka u sahalla inay nololmaalmeedkooda ku sameeyaan doorashooyin waara. Waddooyin tareen, tamarta la cusboonayn karo, tareenada yaryar ee magaalada dhexdeeda ka shaqeeya, jidad baasgeel iyo magaalooyin quwadda korontada ku fiican ayaa ah mustaqbal. Haddaanu nahay kuwa cagaaran, waxa aanu rabnaa in aanu samayno maalgelinaha loo baahanyahay. Qaar faa'iido leh uun ma aha- ee shaqooyin badan ayeey keenayaan.

Waxanu doonaynaa in aanu casri

ka dhigno Iswiidhan. Waxanu u baahanahay maalgelin ah dhinaca waxbarashada, cilmibaarista, shirkadaha iyo qandaraasyada. Waxay noqon doontaa mid sahlan in dadku ka dhabeeyaan fikradahooda oo ay ku dhiirraadaan in ay ka tagaan shaqaalenimada, oo ay noqdaan shirkadley.

Waxanu rabnaa in aanu ka baxno bulshadan ah gado oo tuur. Waxa macaash badnaan doonta in alaabta duugga ah la dayactiro. Waxanu doonaynaa in cashuurta dadban laga dhimo adeegyada si loo dhiirrigeliyo macmiilasho bay'ada ku habboon isla markaana la abuurdo shaqooyin. Sidoo kale waxa la abuurayaa fursado shaqo oo fara badan ayadoo la maalgelinayo barwaaqo-sooranka iyo adeegyada dawladda.

Haddaanu nahay qolyaha cagaaran, waxa aanu si joogto ah is-ugu taagannaa dabiicadda marka ay halista gelinayaa dano wakhti gaaban ah. Dadaalkayaga waxa dabada ka riixaya jacayl aannu u qabno dabiicadda, taakulayn

xooggan oo aanu siinayno dadka maanta nool iyo jiilasha soo socda. Siyaasaddayadu waxay higsanaysaa caalam is taageera. Sidaas darteed waxanu ka shaqaynaynaa nabadda, xuquuqda bina-aadanka iyo hub-dhimid caalami ah.

Siyaasaddayadu waa mid xorriyadeed. Waxanu rabnaa in aanu abuurno bulsho siman oo dadka isku si loola dhaqmayo. Taasi annaga waxa ay noo tahay qaddiyad xorriyadeed oo aasaasi ah. Bulshadu waxa ay noqonaysaa mid sii qaniyowda oo dhaqdhaqaaqeedu bato marka la ogolaado kala duwanaanshaha qiyamka iyo habnololeedka. Dadka waxa la siin doonaa fursado nololeed oo cusub. Nadaamyada xasilloonida dib ayaa loo dayactiri doonaa, dadkoo dhanna way qusayn doonaan.

Annaga oo isla jirna xisbiyada aanu wada shaqyano, wuxu xisbiga bay'ada ee cagaarani ku geli doonaa doorashada in la dhiso dawlad wadaag ah oo caskaan-cagaar ah, doorashada baarlamaanka ee 2010 ka dib.

MAALGELI DHIMIDDA SAAMAYNTA CIMILADA IYO SHAQOYIN CUSUB

1. ISWIIDHAN WAXAY QAADAN DOONTAA MAS'UULIYADDA QAYBTEEDA

Iswiidhan waa in ay qaadatao mas'uliyadda caalamiga ah qaybteeda. Qaac siidaynta gaasyada cimilada saamaya waa la dhimi

doonaa si waafsaqsan talooyinka cilmi-baareyaasha. Cashuuraha bay'ada oo kor loo qaado ayaa qaali ka dhigi doona isticmaalka shidaalka qadiimka ah.

2. LABAN LAAB AWOODDA SHABAKADDA WADDOOYINKA TAREENKA

Siyaasad gaadiid oo cimilada u fiican oo wadanka dhan ka hirgashaa waxay u baahantahay maalgelin xooggan oo lagu sameeyo wad-

dooyinka tareemada. Awoodda gaadiidka dadka iyo alaabooyinka waa la labanlaabi doonaa. Waxanu rabnaa in aanu dhisno waddooyin loogu talagalay xawaaraha deg-degga ah, dabadeedna aanu isku xirno magaalooyinka waaweyn ee Stockholm, Göteborg iyo Malmö oo lagu daray Kobenheegen iyo Oslo. Waxa kale oo aanu rabnaa in aanu isku xirno waddooyinka asalka ah iyo waddooyinka gobollada si loo xoojiyo isku xirnaanta gobollada. Tareenka raaciddiisa ayaa ka raqiisnaa doonta in baabuur la kaxaysto ama dayaarad la raaco.

3. BALLAARI GAADIIDKA DADWEYNAHA

Si loo abuurto magaalooyin cimilada u wanaagsan, waxanu rabnaa in aanu maalgelino xoog u ballaariinta gaadiidka dadweynaha, sida tareenada yaryar ee magaalooyinka dhexdooda ka shaqeeya, tareenada gobollada, tareenada dhulka hoostiisa iyo basaska. Waxanu rabnaa in aanu labanlaabno gaadiidka dadweynaha ilaa sanadka 2020. Wax baahi ah looma qabo waddooyin waaweyn ee baabuurta oo cusub. Gaadiidka guud ee dadweynuhu wuxu noqon doonaa mid sahlan oo ay isticmaali karaan dadka laxaadhkoodu kala dhimanyahay.

4. SHIDAAL CUSUB OO BAABUURTA AH

Dad badan oo Iswiidhan ku sugani waxa ay ku tiirsanyihiin baabuurka. Shidaallada qadiimka ah waxa loo baahanyahay in suuqa laga saaro bay'ada darteed iyo qarashka dartii. Sidaas darteed waa in dhammaan la siiyo fursad ay ku dhaansadaan shidaalka la cusboonayn karo. Wax soo saarka waddaniga ah iyo qaybinta shidaal la cusboonayn karo, ayaa loo danayn doonaa. Waxa suurtoagal noqon doona in lagu shubto gaariga gaas dabiici ah iyo in la cab-baysan karo baabuurka korontada ku shaqeeya waddanka oo dhan.

5. SAMEE KORONTO KUU GAAR AH

Waxanu rabnaa in soo saaridda koronto gaar ah laga dhigo wax faa'iido leh. Dad badan ayaa raba in ay maalgashadaan tamarta la cusboonayn karo oo ay gacan ka gaystaan dhimitaanka saamayntooda cimilada. Taas macneheedu waxa weeye in sidoo kale ay dad badani soo marin karaan korontada la cusboonayn karo, laymanka korontada. Waxanu rabnaa in aanu ku so orogno korontada la cusboonayn karo nadaam qiimo go'an ah, isla markaana aanu u suurtoogelino shirkadaha yaryar ee korontada soo saara, cabbirka intii la isticmaalay oo keli ah.

6. MAALGELI TAMARTA LA CUSBOONAYN KARO IYO DARDARGELINTA TAMARTA

Waxanu rabnaa in aanu tamarta nukliyeerka iyo shidaalka qadiimka ah ku beddelno tamarta dabaysha, shidaalka biyoalajiga ah, tamarta mawjadaha, tamarta qor-raxda iyo dardargelinta tamarta. Waxanu rabnaa in aanu maalgelinno dib u dhis keenaya in la dhimo isticmaalka tamarta. Markaa waxa yaraanaya qarashaadkii tamarta. Soo saaridda macdanta yuuraaniyam-tana waa la mamnoocayaa.

7. DIB U HABAYNTA DHISMAYAASHII MILJONPROGRAMMEN

Waxanu rabnaa in aanu hirgelinno maalgelin taageero ah oo khaas ah, si aanu u dhisno, una habayno guryihii gaboobay iyo faras-magaa-layaasha xaafadaha, gaar ahaan kuwa dacallada magaalada. Maalgelinahaasi waxa ay keeni doonaan bay'ooyin deegaan oo fiican iyo isticmaalka tamarta oo yaraada.

8. ALAABO BADAN IN TAREENKA IYO DOONYAHA LAGU RARO

Si loo kordhiyo ammaanka gaa-

diidka ee waddooyinkeena, loona yareeyo qaac sii deynta, waxanu rabnaa in aanu cashuur ku soo rognno wax ku raridda baabuurta waaweyn. Waxa ka faa'iido badan in alaabaha lagu raro tareennada iyo doonyaha halkii lagaga rari lahaa baabuurta waaweyn.

9. ILAALI DABIICADDA IYO KALA DUWANAANTA BAYOOLAJIGA AH

Dooxoooyinka iyo dhulalka deyran ee hodanka ku ah geedaha iyo noolaha kala duwan waa la dhawri doonaa, ilaalinta xeebahana waa la sii xoojin doonaa. Kaymaha dabiiciga ah ee qiimaha badan waa la ilaalin doonaa. Iswiidhan waxay wakhtiga dheer sii lahaan doontaa noocyo xoog badan oo ka mid ah farta bahal ee waaweyn ee kala ah: Yey-ga, LO-da, Buti iyo dawaco. Faafitaanka sumaha bay'ada waa in la yareeyo tusaale ahaan ayadoo la mamnoocayo qaar badan oo ka mid ah maaddooyinka otolka hakiya iyo kuwa hormoonada khalkhalka geliya. Waxanu doonaynaa in aanu ilaalinno oo aanu dib u soo celinno dhulalka qoyan iyo in aanu sharciiga ku difaacno biyaha dhulka hoose ee muhiimka u ah isku fillaansha biyaha.

10. BEERASHO DHUL AYADOO LA TIXGELINAYO XAYAWAANKA

Isticmaalka sunta cayayaanka iyo nafaqaynta carrada ee laga ganacsado waa la yarayn doonaa. Ilaalinta xayawaanka waa la xoojin doonaa, waxaanu rabnaa in la mamnooco beerashada dhogorta. Dhulka fiican waa la ilaalin doonaa. Waxanu doonaynaa in aanu ka dhigno wax laga macaasho beerashada dabiiciga ah ee cimriga dheer. Iswiidhan waxa ay noqon doontaa mid hoggaamisa ganacsiga cagaaran sida dalxiiska dabiicadda iyo samayn kooban oo raashinka ah. Waxanu doonaynaa in aanu dhulka ka ilaalinno beerashada waxyaalaha unugaydooda la dhalan rogay.

SHAQOYIN CUSUB, QANDARAAS QAADASHO IYO SHIRKADO YARYAR

11. CASHURTA DADBAN OO LAGA DHIMO SHIRKADAH ADEEGGA

Waxanu doonaynaa in ay waaxda adeeggu korto ayadoo laamo badan laga dhimayo cashuurta dadban. Markaa waxa raqiis noqonaya dayactirka alaabaha dhaawacma, makhaayad ka cuntaynta, timojare booqashada iyo hagaajinta baasgeeladaha. Waa in la dhiirrigeliyo adeegyo-macmiilasho waarta, waxanuu rabnaa in aanu tallaabada koowaad qaadno inta lagu guda jiro muddada xilhaynta.

12. CASHUR KA DHIMIDDA SHIRKADAH YARYAR

Waxanu rabnaa in aanu ka dhinno shirkadaha yaryar khidmadda shaqo-bixiyaha ilaa boqolkiiba toban. Waxanu rabnaa in aanu cashuur dhimid kale u sii samayno shirkadaha qofka keliya ah, sanadka koowaad ee ay qofka koowaad shaqaalaysiiyaan.

13. HANTIDA LAGU MAALGASHANAYO SHIRKADAH YARYAR IYO KUWA DHEXE

Waxanu rabnaa in aanu samaynno sanduuq hantiyeed maalgashi oo ay dawladdu leedahay, si loogu sahlo shirkado badan oo yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah in ay helaan hanti maalgashi. Sanduuqaas waxa laga maalgelin doonaa macaashka shirkadaha dawladda.

14. GANACSI HORMUUD AH

Qandaraasle yaal fara badan oo cusubi waxay leeyihiin awood ay ku qaataan mas'uuliyad akhlaaqeed iyo mid bulsho oo weyn. Taasi waxay gacan ka geysanaysaa horumar waara. Habdhaqanka noocaas ah waa la horumarin doonaa. Waxanu rabnaa in aanu kordhino qarashka loogu talagalay halabuurka cusub, horumarinta wax soo saarka iyo horumarinta farsamda bay'ada ee shirkadaha yaryar iyo shirkadaha dhexe. Shirkadaha dawladda iyo kuwa degmooyinku waxa ay gacan ka geysan doonaan farsamada bay'ada ee cusub, tamarta la cusboonayn karo, waxaanay tusaale wanaagsan u noqon doonaan arrimaha la xiriiira dhimidda saamayntooda cimilada. Ganacsi bulsho iyo mid iskaashato waxay qayb ka noqon doonaan siyaasadda ganacsiga ee cagaaran. Waxanu ka shaqaynaynaa shirkado badan oo ka hirgala gobollada. Waxanu rabnaa in aanu si firfircoon uga shaqayno in laga faa'iidaysto oo la hagaajiyo fursadaha ah in la siiyo tixgelin bulsho, mid akhlaaqeed iyo mid bay'adeed la siiyo marka heshiisyada dawladda la iibsano.

15. SHAQO IYO WAXBARASHO LA SIIYO DHALINYARADA

Waxanu rabnaa in aanu soo rognoo barnaamij tababarasho shaqo oo dhinaca barwaaqo-sooranka ah. Waxa kale oo loo baahanyahay maalgelin dheeraad ah oo lagu sameeyo waxbarashooyinka xirfadeed iyo goobo lagu tababarto. Kulliyado badan ayaa bixin doona tababarasho shaqo oo lagu soo sameeyo shirkadaha iyo hay'adaha dawladda, taas oo qayb ka ah barnaamijka waxbarasho.

16. BARNAAMIJ DHAQAMEED FURAN OO BALLAARAN

Nolol dhaqameed shidan oo hal-abuur lehi waa qodob horumar oo muhiim u ah caafimaadka, tayada nolosha iyo horumarka bulshada. Waxanu rabnaa in aanu xoogga saarno dhaqanka, si dhammaan dadka gaar ahaan carruurta iyo dhalinyarada loo siiyo fursad ay kaga qaybqaataan hawlaha dhaqanka, hadday tahay soo bandhigid iyo hadday tahay daawashaba. Iskuullada dhaqanka waa la xoojin doonaa. Dhaqanku waa doorasho cimilada ugu fiican macmiilashada walxaha.

KOR U QAAD TAYADA BARWAAQO-SOORANKA, MAALGELI WAXBARASHADA

17. QOFNA MA NOQON DOONO BILAA CAYMIS

Caymisyo-bukaan oo xasillooni leh oo casri ah ayaa dhammaan dadka qusaynaya. Waxanu rabnaa in lacagta jirrada la bixin karo in alla inta dadku jirrayihiin iyo in xadka caymiska jirrada ee dambe la qaado. Mas'uuliyadda bulshada ka saaran dhaqan wax ku ool ah, waxay leedahay muhiimad gaar ahaaneed. Caymis guud oo shaqo-la'aanta ah ayaa dadka oo dhan qusaynaya.

18. WAKHTI SHAQO OO GAABAN

Waxanu rabnaa in aanu hoos u dhigno wakhtiga shaqada ilaa 35 saanacadoo wiigiiba, si dadka loo siiyo wakhti dheeraad ah iyo tayo xagga nolosha ah. Tallaabada koowaad waxanu ka dhigaynaa in aanu soo rognno taageero la siinayo waalidiinta haysta carruur yaryar oo laga dhimo wakhtiga shaqada iyo weliba in la soo celiyo sanadkii bilaa shaqada ahaa (friâret). Waxanu rabnaa in aanu albaabada u furno da' da hawlgabka oo isbedbedeli karta iyo in aanu abuurno fursado fiican oo wakhtiga shaqada lagu dhimi karo marka lagu soo dhawaado hawlgabka.

19. KALA DUDUWANAANTA ISKUULKA DHEXDIISA

Carruurta waxa ay xaq u leeyihiin in ay iskuulka ku helaan qalabka ay u baahanyihiin noloshooda. Waalidiinta iyo carruurta waxa ay heli doonaan fursado fiican oo ay saamayn ku yeeshaan waxbarashada, kuna dooran karaan nadaam tarbiyadeed oo ku habboon. Carruurta

oo dhan waxay noqon doonaan kuwo muuqda oo wakhti ka hela dadka waaweyn iskuulka iyo xannaanadaba. Tayada xannaanooyinka iyo iskuullada aasaasiga ah ee Iswiidhan waa in kor loo qaado. Waxaynu u baahannahay in la kordhiyo tirada macallimiinta, iyo in la yareeyo kooxaha carruurta ee fasallada iyo in la kordhiyo wakhtiga waxbarashada ee jadwalka leh. Waxanu rabnaa in aanu ilaalinnno kala duduwanaanta iskuulka ka jirta, tarbiyada iyo qorshayaasha waxbarashada. Waxanu rabnaa in aanu xoojinno dimoqoraaddiyadda ardayda iyo in aanu maalgelinno daryeelka caafimaadka ardayda.

20. U GOLOW CARRUURTA IN AY AHAADAAN CARRUUR

Carruurnimo xasillooni oo ciyaar badan waa inay ahaato xaq dadkoo dhami leeyahay. Bulsho carruurta u fiicani, way u fiicantahay cid walba. Waxanu rabnaa in aanu xoojinno xuquuqda carruurta oo aanu xeerka caalamiga ah ee carruurta ku soo darno sharciga Iswiidhan.

21. DARYEEL CAAFIMAAD OO KA HORTAG AH

Hab shaqo oo ka hor tag ah, caafimaadkana horumarinaya, waa in uu saameeyo daryeel kasta iyo xannaano kasta. Daryeelka caafimaadku waa inuu noqdo mid loo siman yahay oo u dhow muwaadiniinta. Waa in uu ku tilmaanaado shaqo-kooxeed iyo aqoon ballaaran oo dawo, mid cilmi-nafi iyo mid bulsho. Waxa loo baahanyahay maalgelin khaas ah si loo dhimo caafimaad darrada maskaxeed iyo si loo hagaajiyo daryeelka dadka waaweyn. Si loo

yareeyo isticmaalka qaldan ee dawooyinka, waxa la xoojin doonaa kontoroolka iyo ka warqabka.

22. CUNTADA WANAAGSAN

Waxanu rabnaa in aanu samayno tayo kor u qaadiid si ay u fiicnaadaan cuntooyinka iskuullada, xannaanada dadka waaweyn iyo isbitaallada. Carruurta, dadka waaweyn iyo kuwa jirrani waxay heli doonaan cunto lagu kariyey jikooyin ku yaalla isla iskuullada, meesha xannaanada dadka waaweyn iyo isbitaal-lada, halkii laga siin lahaa cunto la diiriyey oo meelo fogfog laga soo qaaday. Cuntooyinka dabiiciga ah iyo cuntooyinka dalka gudahiisa laga soo saaro ayaa lagu dalban doonaa gorgortanka iibsashada, sidaas darteed waa in sharciga ku saabsan iibsiga heshiisyada dawladda dib loo eego si loo ogolaado in la horumariyo adeegashada dhow. Cunto macaan oo nafaqo badani waxay qayb ka tahay barwaaqo-sooranka.

23. JAAMACAD LA XOOJIYO IYO LACAGTA WAXBARASHADA OO LA BADIYO

Nadaamka waxbarashadu waa xudunta bulsho casri ah oo aqoon ku dhisan. Tayada jaamacadaha waxa kor loogu qaadi doonaa ardayda oo wakhti dheeraad ah u hesha macalimiinta iyo xoog dheeraad ah oo la saaro tarbiyadda. Waxanu rabnaa in aanu dadka siino fursado nololeed oo cusub oo aanu u fududayno in da' walba wax lagu barto. Sidaas darteed waxanu rabnaa in la badiyo kaalmada lacageed ee waxbarashada iyo in la hagaajiyo shabakadda ilaalinta bulsho ee ardayda. Wada shaqaynta ka dhaxaysa jaamacadaha/kulliyadaha iyo ganacsiga waa la xoojin doonaa.

BULSH SINNAANI KA JIRTA WAXAY KOR U QAADAYSAA XORRIYADDA

24. SINNAANTA QOYSKA IYO MAAMULKA SHIRKADDA

Labada waalidba xaq ayey u leeyihiin in ay guriga la joogaan ilmahooda, ilmuhuna xaq ayuu u leeyahay labada waalidba. Waanu u aragnaa in caymiska waalidnimada loo qaybiyo saddex qaybood, halkaas oo waalid waliba helayo qayb ka mid ah caymiska iyo in ay qaybta saddexaad u qorshayn karaan sidii ay jeclaadaan. Taasi waxay kor u qaadaysaa fursadda lagu gaarayo waalidnimo sinnaan leh. Waxanu rabnaa in aanu hirgelinno sharci ku saabsan qoondayn go'an oo maamulka shirkadaha dawladda iyo shirkadaha suuqa maalgelinta ah.

25. NABADGELYADA DUMARKU WAA XORRIYAD

Wxanu rabnaa in aanu kordhinno hantida ururada heeganka haweenka ah ee ay kaga shaqaynayaan nabadgelyada dumarka. Qaabilaadda nadaamka caddaaladdu waa in uu noqdo mid aqoon leh oo tixgelin badan. Shuruucda kufsiga ku saabsan waa in la adkeeyo si loo damaanad qaado xorriyadda galmada. Carruurta markhaati ka noqota dagaal guriga ka dhaca, waa in loo aqoonsado dhibbanayaal dembi. Kuwa lagu xukumo in ay jir-dil sameeyeen waa in lagu qasbo daryeel caafimaad. Xiitaa dagaalka ragga lagu sameeyo iyo weliba dagaalka ka dhex dhaca dadka ay ka dhaxayso calaaqo jinsi ee haddana isku nooca ah, waa in lagu baraarugo. Lacag dheeraad ah ayaa loo baahanayaa si looga hortago dhillaysiga iyo ka ganacsiga dadka.

26. XUQUUQ ISKU MID AH DADKOO DHAN

Shuruucda la dagaallanka takooroorka waa in la xoojiyo. Waxanu rabnaa in la horumariyo sinnaanta xuquuqda ee shirkadaha iyo hay'adaha dawladda. Xafiisyada gobollada ee la dagaallanka takooridda waa la xoojin doonaa. Waxanu rabaa in aanu sii wadno ka shaqaynta xuquuqda dadka aanay galmadoodu ku koobnayn jinsiga ka soo horjeeda uun. Shaqada lagaga soo horjeedo dembiyada ku dhisan nacaybka waa in la xoojiyo. Dhammaan dadku waxa ay yeelan doonaa fursad ay si buuxda mas'uuliyad u yeeshaan. Waxanu rabnaa in helitaan adkaanta loo aqoonsado mid sharci ahaan, toorid ku ah dadka laxaadkoodu kala dhimanyahay.

27. BARASHADA AFKA HOoyo

Hababka ugu waxtarka badan ee lagu hagaajin karo natiijada waxbarashada marka ay carruurtu leeyihiin af hooyo oo aan Iswiidhishka ahayn, waa in xoogga la saaro baridda afka hooyo. Waxanu rabnaa in xuquuqda barashad afka hooyo aanu ka dhigno mid jirta iskuulka aasaasiga ah oo dhan. Waxa kale oo aanu rabnaa in la kordhiyo maaddooyinka lagu baranayo afka hooyo.

28. WAXBARASHADA IYO SHAQADA SOO GALOOTIGA CUSUB

Soo gelootiga cusubi waa inay si dhakhso ah u baran karaan afka, oo loogu qiimayn karo ama loogu dhammaystiri karo waxbarashadooda si ay shaqo helaan. Waxanu rabnaa in waxbarashada

af Iswiidhishka lagu daro tababarasho shaqo. Waxanu rabnaa in jaamacadaha iyo kulliyaduhu ay siiyaan koorsooyin af iswiidhishka ah dadka Iswiidhan yimaaadda ayagoo leh aqoon jaamacadeed.

29. ILAALINTA XAQ U LAHAANSHA NOLOL BARAYFAD AH

Bulshada dhexdeeda waxa la xaddidaa xuquuqda dadka ee nololshada barayfadka ah. Waxanu rabnaa in la adkeeyo shuruucda lagu bixinayo ruqsadda kamaradaha wax waardiyeeya, si qofka shakhsiga ah xorriyaddiisa tixgelin gaar ah loo siiyo. Dawladdu xaq uma yeelan doonto in ay diiwaangeliso dadka internetka isticmaala meelaha ay galaan oo dhan Iswiidhan. Waxanu rabnaa in la joojiyo sharciga FRA.

30. INTERNET XOR AH IYO XUQUUQDA LAHAANSHAHA OO ISKU DHEELI TIRAN

Waxanu rabnaa in aanu ilaalinno ammaanka caddaaladda iyo ammaanka xorriyada ee internetka, ayadoo wax laga bedelayo sharciga IPRED. Waxanu rabnaa in aanu casriyeynu xuquuqda lahaanshaha iyo in liiska dembiyada laga saaro faylasha loo kala qaadanayo adeegsi khaas ah. dhexdhexaadnimada internetku waa mabd'a muhiim ah oo ay tahay in la ilaaliyo.

CAALAM CADDAALAD AH OO WAARAA WAA SUURTAGAL

31. SIYAASAD CIMILO OO CAALAMI AH OO WAX KU OOL AH

Qaac siidaynta caalamiga ah ee gaasaska cimilada saamaynaya waa muhiim in la dhimo. Waxanu rabnaa in aanu u hawlgalno si caalami ah si loo joojiyo taageero kasta oo la siiyo dhuxusha, saliidda iyo quwadda nukliyeerka. Waxanu rabnaa in aanu ku soo rognno khimado bay'ada ah shidaalka qadiimka ah ee duullimaadyada caalamiga ah iyo gaadiidka badda si lacag loo siiyo wax ka qabashada cimilada ee waddamada faqiirka ah. Taageerada caalamiga ah ee waxqabadka cimilada waddamada soo koraya waa in la kordhiyo.

32. LA DAGAALLANKA FAQRIGA

Waxanu rabnaa in aanu ka shaqayno ganacsi cadaalad ku dhisan oo si wanaagsan u danaynaya baahida waddamada faqiirka ah. Heerka samafalka Iswiidhan waa in uu ka ahaado BNI-ga boqolkiiba hal ugu yaraan. Iswiidhan waxa ay ka hortegi doontaa in waddamada faqiirka ahi ku dhacaan dabinno qaameed, waxayna ka shaqayn doontaa in laga dhafo daymaha sharci darrada ah. La dagaalanka faqrigu wuxu udub-dhexaad u noqon doonaa siyaasadda arrimaha debedda, ganacsiga io samafalka.

33. JOOJI DHOOFINTA HUBKA

Waxanu rabnaa in aanu joojinno dhoofinta hubka. Tallaabada koowaad waa in la adkeeyo sharciyada dhoofinta hubka Iswiidhan. Waa wax aan la aqbali karin in hubka Iswiidhan loo dhoofiyo waddamada ku tunta xuquuqda bina-Aadanka. Waxanu leenahay MAYA, in balaayiin lacag ah lagu maalgeliyo naqshad cusub oo la casriyeeyey oo dayaaradda JAS ah. Iswiidhan debedda ayey ka joogaysaa NATO. Dadaallada nabad lagaga abuurayo caalamka waa in la kordhiyo. Waxanu kaloo rabnaa in la mamnooco in miinooyinka iyo bambooyinka firdha lagu sameeyo Iswiidhan.

34. JOOJI KALLUUMAYSIGA BA'AN EE MALLAYGA BADAHEENA

Dhammaan taageerooyinka keenaya xaalufinta kalluunka waa in la joojiyo. Kalluunka Torsk iyo noocyada kalluumada kale ee baddeena waa in laga nabadgeliyo kalluumaysiga haddii tiradoodu ka hoos marto heerarka habboon. Gacan-bir ah ayaa loo baahanyey in lagu qabto kalluumaysiga sharci darrada ah. Waxanu sidoo kale la soconaynaa siyaasadda ganacsiga Iswiidhan si kalluumaysiga ba'an ee badaha kale loo yareeyo.

35. TIXGELINTA XUQUUQDA BINA-AADANKA EE DHINACA SIYAASADDA QAXOOTIGA

Waxanu rabnaa in aanu abuurno waddooyin badan oo sharci ah oo lagu soo galo Iswiidhan. Siyaasad qaxooti oo bina-aadminimo leh ayaa loo baahanyahay. Waxa muddo dheer ku jiray geeddi socodka siyaasadda qaxootiga ee Iswiidhan goldaloolooyin, sidaas darteed waxanu rabnaa in cafis guud loo fidiyo dadka bilaa aqoonsiga ah. Sida ilmaha u wanaagsan ayaa laga horraysiinaya qaadiyad kasta oo qiimaynta qaxootiga ah. Kuwa bilaa aqoonsiga ahi waxay xaq u yeelan doonaan daryeel caafimaad iyo waxbarasho.

36. MAYA LACAGTA YURUB EE EMU

Waxanu rabnaa in ay Iswiidhan haysato lacagteeda oo aanay gelin nadaamka lacagta ee EMU. Midwaga yurub ee EU waa in uu noqdo mid dimoqoraaddi ah oo aan kor laga maamulin. EU-du ma yeelan doonto difaac midaysan.

**19-KA SEBTEMBER
U CODEE, ISWIIDHAN
CAGAARAN OO
BINA-AADANIMO
LEH OO CASRI AH.**

Wax dheeraad ah ka sii akhri www.mp.se

Xubin kaga noqo sms. U dir qoraalka kan
"mpmedl ååååmmddxxx" lambarka telefoonkan 72456,.
Qarashku waa 50:- + qarashka diritaanka.

miljöpartiet de gröna

